


Waxaad waraysiga Hoggaanka socdaalka kaga qaybgalaysaa wadaxiriirka dhanka fiidiyowga ah, adiga oo jooga xabsiga



Waraysiga lagu qaadaayo fiidiyowga waxaa loola jeedaa, in qofka shaqaalaha Waaxda Socdaalka ee waraysiga kaa qaadaaya uu joogo Xarunta Waaxda Socdaalka, adiguna aad waraysiga dhanka fiidiyowga kaga qaybqaadanayso adigoo jooga xabsiga. Waxaan adiga kuu qabannay waraysiga dartiis, meeshii lagugu waraysan lahaa iyo qalabkii loo baahnaaba.

Waraysiga lagu qaadaayo dhanka fiidiyowga ah, wax saamayn ah kuma yeelanaayo waxyaabaha waraysigu uu ka kooban yahay




Waraysiga waa mid isku mid ah, haddii lagaaga qaado dhanka fiidiyowga iyo haddii qofka waraysiga qaadaaya iyo adigu aad isku meel joogtaanba. Waraysiga waxaan ku qaadaynaa dhanka videoga, waayo xilligaan haatan ah waxaad ku jnirtaa xabsiga


Qaabkaan ayaad uga qaybqaadan kartaa waraysiga fiidiyoowga




Shaqaalaha xabsiga ayaa ku siinaya waraaqda ballanka ee Hoggaanka socdaalku kuu soo direy iyo talosoojedinta ku saabsan waraysiga. Waraaqda laguugu yeeraayo waraysiga waxaa ku qoran, taariikhda waraysiga la qaadaayo.



Shaqaalaha xabsiga ayaa maalinka waraysiga ku geynaaya qolka loogu talaggalay in waraysigu ka dhaco. Waxaana uu kuu sheegaayaa, qofka aad caawimaadda ka heli karto, haddii xilliga waraysiga ay soo baxaan wax cillado ah, tusaale ahaan dhan xiriirka fiidiyowga



Annaga ayaa kugula soo xiriireyna fiidiyowga isla waqtiga aan kuugu soo sheegnay waraaqda u yeerista. Waxaan kuu qabannay turjubaan, kaasoo turjumi doona dhammaanba waxa lagu wada hadlaayo. Turjubaankuna wuxu ku turjumi doonaa dhanka fiidiyowga.



Qoraalka laga sameeyo waraysiga waan isla hubinaynaa annagoo khadka fiidiyowga ku wada jirna. Waxaad weli samayn kartaa wixii sixitaan ama wax ka beddel ah. Waxaan boostada kuugu soo direynnaa laba koobi oo ah qoraalkii laga sameeyay waraysiga, si aad u soo saxiixdo. Waxaa qoraalka la socda baqshaddii lagu soo celin lahaa, taasoo kharashkii boostada uu diyaar yahay oo la sii bixiyay. Waxaad saxiixdaa bogga ugu dambeeya ee labada dukuminti. Intaa dabadeed mid ka mid ah labada dukuminti intaad baqshada ku riddo, waxaad dib ugu soo dirtaa Waaxda Socdaalka. Midka kale ee dukumintiga ah adiga ayaa haysanaaya.